Nationwide Children's
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Tuubada Neef-mareenka: Waa Maxay
# Tracheostomy Tube: What It Is (Somali)

Tuubada Neef-mareenka (neefmareenka) waxay bixisaa waddo kale oo lagu helo neef-mareenka marka laga soo tago afka ama sanka. Waxay ka caawisaa cunugaaga inuu neefsado taas oo kuu ogolaanaysa inaad ka saarto xabka neef-mareenkiisa. Waa tuubo yar oo lagu geliyo qaybta hore ee qoorta cunugaaga.

Waxaa jira sababo badan oo carruurta loogu baahan karo tuubada neef-mareenka. Sababaha ugu caansan waa taageerada neefsashada muddada dheer, xannibaad ku timaada neef-mareenka sare, ama maareynta dheecaannada. Dhakhtarka cunugaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ayaa kula hadli doona sababta cunugaagu ugu baahan yahay tuubada neef-mareenka. Mudada cunugaagu hayn doono tuubada waxay ku xirnaan doontaa xaaladiisa iyo baahiyihiisa.

## Nidaamka Neefsashada

Nidaamka neefsashada waa koox xubno ah oo kaa caawiya neefsashada (Sawirka 1). Waxay ka kooban tahay qaybo badan:

- Sanka – Wuxuu sifaynayaa, qoynayaa, oo kululeeyaa hawada u socota sambabada.
- Afka iyo hunguriga
- Hunguriga sare (Pharynx) – Waa qaybta hunguriga ee ka dambeysa sanka.
- Sanduuqa codka – Waa sanduuqa codka oo sameeya dhawaaqyo kuna oggolaanaya inaad hadasho.




**Sawirka 1** Nidaamka Neefsashada


©2012, Dib loo eegay 2024, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- Neef-mareenka (Trachea) – Wuxuu hawada ka qaadaa hunguriga kuna gudbiyaa sambabada.
- Hawo-mareenka – Waxay hawada u gudbiyaan neefta, halkaas oo kaarboon laba ogsaydhka loo beddelo ogsijiin.
- Sambabada – Waxay jidhka u ogolaadaan inuu qaato ogsijiin oo ka saaro kaarboon laba ogsaydh iyada oo loo marayo neefsashada gudaha (soo neefsasho) iyo neefsashada dibadda (neefsi saarid).

## Maxaa Loogu Baahan Yahay Naf-mareenka

Tuubada neef-mareenka waxaa loo baahan karaa muddo gaaban ama muddo dheer, iyadoo ku xiran baahida cunugaaga. Sababaha ugu caansan ee neef-mareenka loo sameeyo waa:

- **Xannibaad** ku timaada neef-mareenka sare. Waxyaabaha keeni kara in neef-mareenka xannibo waxaa ka mid ah:
  - Qaybo ku jira sanka ama hunguriga oo aan si habboon u koraan.
  - Xadhkaha codka oo aan shaqaynayn (naafo ah).
  - Cidhiidhiga sanduuqa codka ama neef-mareenka (trachea).
  - Neef-mareen daciif ah ama jilicsan.
- **Xabka, cuntada, ama candhuufta** aan laga saari karin sambabada iyo neef-mareenka.

  Haddii xabka uu ku sii jiro sambabada ama haddii cuntada ama candhuufta si joogto ah ugu galaan sambabada, cunuga wuxuu u nuglaanayaa infekshannada.
- **Caawinta** neefsashada muddada dheer.

  Tuubbada neef-mareenka ayaa la galaa marka ilmuhu ay tahay inuu ku jiro mishiinka neefsashada (hawo-qaadaha) muddo dheer. Waxaa laga yaabaa inay guriga ku aadaan xabag iyo hawo-qaade.

## Meelaynta Tuubada neef-mareenka

- Sanduuqa Codka Qalliinka tuubada dhuunta lagu geliyo waxa la dhahaa Dhuun-daloolin. Dhakhtarka qalliinka waxa uu ka sameeyaa dalool, oo loo yaqaan stoma, xagga hore ee qoorta (Sawirka 2).




**Sawirka 2** Tuubada tracheostomy waxaa la geliyaa hawo mareenka ka hooseeya xadhkaha codka.

- Kadib, waxay daloolka geliyaan tuubo qaloocan oo loo yaqaan tuubada neef-mareenka (neef-mareenka). Waxaa lagu hayaa meesha inta dalooladu kabogsanayso. Marka ay bogsato, tuubada waxaa lagu hayaa meesha iyadoo la adeegsanayo xargaha neef-mareenka.
- Tuubada ugu horreysa ee neef-mareenka ayaa la beddelaa qiyaastii hal toddobaad qalliinka ka dib, marka daloolka bogsato.

## Sida Tuubada Neef-mareenka U Shaqeyso

- Hawada waxaa lagu neefsan karaa ama lagu siin karaa hawo-mareen ama mashiinka CPAP. Waxay hawada ka soo gashaa tuubada neef-mareenka oo ku gasha sambabada.
- Xabka (dheecaannada) waxaa laga nuugaa tuubada tracheostomy-ga si loo caawiyo in neef-mareenka uu furan ahaado.
- Haddii bixiyahaaga daryeelka caafimaadka uu go'aansado in aan loo baahnayn tuubada neef-mareenka, waa la saari karaa. Daloolka (daloolka) wuxuu bogsan doonaa oo xirnaan doonaa.
- Cunugaaga laga yaabaa inuusan ooyi karin ama hadli karin inta tuubada neef-mareenka ay ku jirto meesha. Tani waxay sabab u tahay in ay adkaanayso in hawadu ka dul marto xadhkaha codka ee sanduuqa codka si ay u gariiraan. Waxaa jira siyaabo lagu hagaajin karo codka iyadoo tuubada neef-mareenka ay ku jirto meesha. Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee cunugaaga ayaa kula wadaagi doona arrimahan waqtiga ku habboon.
- Dhakhtar ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ayaa kula hadli doona aaladaha u ogolaanaya cunugaaga inuu hadlo.

## Noocyada Tuubbooyinka Neef-mareenka

Waxaa jira noocyo badan oo tuubooyin neef-mareenka ah. Badanaa, tuubada xamaamka ugu horeysa waxay leedahay katiinad ka ilaalinaysa inay hawadu ka soo daadanayso agagaarka tuubada.

Nooca tuubada dhuunta ee Ilmahaaga waxay ku xiran tahay:

- Sababta cunugaaga ugu baahan yahay neef-mareenka.
- Cabbirka neef-mareenka cunugaaga.
- Haddii cunugaaga uu u baahan yahay mashiinka neefsashada.

## Daryeelka Tuubada looga talagalay neef-mareenka

Haddii aad oggolaato in cunugaaga loo sameeyo tracheostomy, waxaad baran doontaa sida loo daryeelo. Kuwaan waxaa kamid ah:

- Nuugidda
- Beddellaadda teyada tuubada dhuunta
- Sameynta `CPR' iyadoo ay ku jirto tuubada dhuuntu
- Nadiifinta afka `stoma'
- Beddellaadda tuubada dhuunta
- Xallinta Mashaakilka

Waxaad ka caawin doontaa daryeelka neef-mareenka cunugaaga ka dib marka la beddelo tuubada neef-mareenka ee ugu horreysa. Waxaad sidoo kale tagi doontaa fasallo lagu qabto Xarunta Kheyraadka Qoyska. Tani waxay kuu ogolaanaysaa inaad ku tababarto isbitaalka oo aad barato waxa aad guriga ku qabanayso.

## Diyaarinta Soo-Bixitaanka Isbitaalka

Kahor inta aan cunugaaga guriga loo celin, waxaad daryeeli doontaa cunugaaga 24 saacadood oo joogto ah isbitaalka. Tani waxay ku caawineysaa inaad u diyaar garowdo daryeelka cunugaaga guriga.

Kahor inta cunugaaga aanu ka tegin isbitaalka, samee waxyaabahan guriga:

- **Soo ogow inta amps** ee looga baahan yahay qalabka cunugaaga uu guriga ku isticmaali doono. Amps waa cabbirka korontada. Shirkadda bixisa qalabka ayaa ku siin karta macluumaadkan qalab kasta oo mashiin ah.

  U yeelo koronto-yahan inuu hubiyo awoodda korontada gurigaaga. Waxaad u baahan doontaa xaddig gaar ah oo koronto ah si aad u isticmaasho qalabka. Muuji koronto yaqaanka meesha aad rabto in aad qalabka ku xirto. Weydii sidoo kale haddii aad isticmaali karto mashiinka nuugista, qalabka neefsashada, iyo/ama mashiinno kale isla waqtigaas.
- **Calaamadee sanduuqa fiilooyinka ama beddelayaasha** wareegga si aad ugu aqoonsato afyarta loo isticmaalo qalabka cunugaaga. Haddii fiilo ama beddelaha wareegga uu qarxo, waa inaad ogaataa midka aad si degdeg ah u dib u hagaajinayso.
- Haddii nidaamka korontadaada uu isticmaalo fiilooyin, **dhig fiilooyin dheeraad ah meel u dhow sanduuqa fiilooyinkaaga**.
- **Sii haay meel dhow tooshka** Ku hay meel u dhow sariirta cunugaaga iyo sanduuqa fiilooyinka ama guddiga beddelayaasha wareegga.
- Hubi in dhammaan **qalabku ay dhulka yihiin**.
- Weeydii shirkadda korontada inay kuu sheegaan goorta ay qorsheynayaan go'itaanka korontada ee aaggaaga. Weeydii inay ku soo wacaan haddii korontadu go'do xilliga habeenkii. La xiriir shirkadda korontada oo u sheeg inaad leedahay cunug isticmaala qalab gaar ah. Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foom.